PreschoolsNSW

Waxbarashada nolosha

Maxaan nahay anagu?

WAA MAXAY MALCAMADUHU?

MALCAMADUHU WAA XARUUMO BULSHO OO DIIRRAN SOO DHAWEYN LEH, HALKAAS OO CALAAQAADYADA IYO XIRIIRADA LAGU SAMEEYO.

Malcamaduhu waxaa laysanka ama rqusada siiya Adeegyada Bulshada oo hoos yimaada Xeerka Adeegyada Carruurta ee 2004 asagoo ah adeegga carruurta.

Malcamado badan ayaa shaqeeya inta u dhaxeysa 9am ilaa 3pm, qaar kalena waxay shaqeeyaan 8am ilaa 4pm, Isniinta ilaa Jumcaha.

Adeegyada qaarkood waxay qoraan waqtiyo kala duwan. Carruurtu way ka faa'idaan ugu yaraan laba maalmood asbuucii oo ay joogaan malcamadda.

Badiba malcamaduhu waxay ku shaqeeyaan ayagoo raacaya xeerarka dugsiyada dadweynaha waxaana la xiraa fasaxyada dugsiyada.

Maclcamaduhu waa inay raacaan heerarka shaqaalaynta ugu hooseysa oo ay samaysay Xukuumadda NSW. Qaarkood waxay dooortaan inay yeeshaan nisbad sare oo shaqaale ah.
- Hal xubin shaqaale siddeedii carruur ah oo kasta da'doodu u dhaxayso laba ilaa saddex sano.
- Hal xubin shaqaale tobankii carruur ah oo kasta da'doodu u dhaxayso saddex ilaa lix sano.

Malcamado badan ayaa (aan dhammaan ahayn) waxay shaqaalaystaan macalin jaamici ah. Tirada shaqaalaha tababaran way kala duwan tahay ayadoo ku xiran baaxadda adeegga. Dhammaan malcamadaha oo dhan waa inay adeegsadaan shaqaale haysta shahaadada gargaarka degdegga ah oo la aqqonsan yahay jooga goobta mar kasta oo carruurtu joogaan. Shaqaale aad u tababaran oo khibrado leh ayaa aad looga doonayaa dugsiyada malcamadaha.

Maclcamaduhu waxaa maamuli kara haya'daha bulshada, kaniisadaha ama dowladda hoose ama waxaa maamula guddi waalidiin. Qaarkood waxay ku xiran yihiin haya'daha dowladda sida dugsiyada.

Maclcamaduha NSW waxay ka soo bilowdeen 1895, markuu bilowday dhaqdhaqaaqii kindhaha, sidaas darteed waxay kaalin weyn ku leeyihiin bulshooyinka NSW.

LA XIRIIR MALCAMADDA DEGAANKAAGA

Si aad u ogaato malcamadda gegaankaaga ka eeg
www.preschoolsnsw.org.au

PRESCHOOL GROWTH PROGRAM

MALCAMADAHA

Malcamadaha (waxaa kaloo loo yaqaan Kindhooyin) waxayna bixiyaan barnaamij waxbarasho oo ku salaysan qaabka malcamadaha mintidsan oo wax u qabta carruurta da'doodu u dhaxeyso saddex ilaa shan sano.

Barnaamijyada wabarasho ayaa la bixiyaa, ayagoo kaafiya baahiyaha, danaha iyo waayo-aragnimada ilmo kasta. Carruurtu guud ahaan waxay tegi karaan dhowr maalmood asbuuciiba.

Badiba adeegyadu waxay shaqeeyaan 9am–3pm keliya inta uu socdo teeramka dugsiga. Malcamadaha qaarkood waxay bixiyaan saacado dheeraad ah, kuwaas oo ka kooban barnaamijka malcamadda oo loo geeyey daryeel dheeraad ah ka-hor iyo ka-dib barnaamijka.

Waxaa jira faai'dooyin badan oo ugu jira carruurta iyo qoysaska oo laga helayo malcamadaha.

WAAYO-ARAGNIMADA MALCAMADDA:

- waxay awoodsiisaa carruurtu inay ka fakaraan, baaraan, wax su'aalaan, ka yaabaan ayna bartaan sida wax loo barto;
- waxay taageertaa dhugmada iyo horumarinta luqadda iyo xirfadaha wada-hadalka carruurta;
- waxay siisaa carruurta wax joogto ah, bareyaal waaya-arag ah oo tababaran si ay u taageerto waxbarashadooda iyo horumarkoodaba;
- waxay hagaajisaa kartida carruurtu ay ku fakaraan, masalooyinka xalliyaan ay wax sabab u yeelaan markay galaan dugsiga;
- waxay horumarisaa koritaanka bulshada iyo caadifadda iyo kartida lagula xiriiro isku-faca iyo waayeelka, xalliyaan khilaafyada, u cayaaraan si iskaashi ah una noqdaan saraaxi;
- waxay siisaa asaas adag ee barasho iyo waxbarasho nolosha oo dhan ah.

MALCAMADUHU WAA:

- goobo xiiso, leh waayo-aragnimooyin kala duwan oo cajiib ah loogu talagalay inay kaafiyaan baahiyaha iyo danaha carruurta;
- qaab lagu dhiso xiriirada bulsheed oo u dhaxeeya qoysaska iyo bulshada;
- manbac laga helo macluumaad xirfad-yaqaan kaas oo taageera waalidnimada.

MALCAMADAHA BULSHADA KU-SLAYSAN

Mid ka mid waxyaalaha ugu waaweyn oo ku saabsan malcamadaha waa inay mar kasta yihiin kuwo bulshada u-shaqeeya, ay maamusho ayna leedahay bulshadu.

Adeegyada bulshada ku-salaysan waa adeegyo aan-faai'do doon ahayn, halkaas oo faai'dada (ama dheeraadka) dib loogu maalgeliyo adeegga, halka kuwa adeegyada faai'do doonka iyo kuwa shirkadaha ay ku shaqeeyaan ujeeddooyin faai'do doon oo ay qaataan milkiileyaasha ama saamileyda.

Waxaa jira **laba nooc oo waaweyn** ee malcamadaha aan faai'do doonka ahayn:

1. Keli-u-taagan, halkaas oo adeegga ay maamulaan guddi ka kooban waalidiinta iyo xubnaha bulshada.
2. Kafaalad-qaad, halkaas oo dhowr malcamadood ay maamusho haya'd, mararka qaarkoodna guddiyo la-talineed oo ka kooban waalidiinta iyo xubnaha bulshada.

Wanaagga malcamadaha bulshada ku-slaysan waa inay guud ahaan maamulaan waalidiinta kuwaas oo waqtigaas ay carruurtoodu dhigtaan malcamadda, taas oo xoojinaysa maalgelinta bulshada ee adeegga. Malcamadaha NSW waxaa u shaqeeya macalimiin iyo bareyaal xirfad-yaqaan ah oo wada barnaamijka isla markaasna maamula malcamadda, ayagoo la kaashanaya waalidiinta ku jirta guddiga maamulka si ay u kaafiyaan baahiyaha bulshada.

Malcamadaha bulshada ku-salaysan oo aan faai'do doonka ahayn waxay bixiyaan barnaamij waxbarasho oo tayo leh iyo fursad gaar ah ee ka-qaybgalka bulshada.

MALCAMADUHU WAXAY KU SALAYSAN YIHIIN

Waxaan anagu ku salaysanahay:

- HAL-ABUUR
- BAARISKA IYO SAHMINTA
- ISKAASHI IYO IS-DHEXGAL BULSHADEED
- QOYSKA IYO BULSHADA
- U-DIYAAR-GAROWGA DUGSIGA
- XALLINTA MASALOOYINKA IYO MADAXBANAANI
- AQRIS-QORAALKA IYO XISAABTA
- WAX KU-BARASHADA CAYAARTA
- SHAQAALE TABABARAN

Waxaa jirta caddayn caalami ah in carruurta kuwaas oo ka qaybgala barnaamijyada waxbarashada malcamadaha oo tayada sare leh inay ka helaan faai'dooyin muddo-dheer oo waaweyn kuwaas oo lagu tiriyo 'waxtarkamalcamadda' (Farrar, et al, 2007).

Kuwaasna waxaa ka mid ah:

- **heerarka sare oo waxbarasho la dhammaystay iyo shaqo-helidda ku xigta;**
- **deganaansho weyn ee xagga xiriirada iyo heerka hoose ee cudurada dhimirka (Farrar, et al, 2007).**

in kastoo ay caddayntu muujinayso in carruurta oo dhan ka faai'daan waxbarashada malcamadaha oo tayada sare leh, faai'dooyinku waxay ugu sii weyn yihiin carruurta ka soojeedda asallada qoysaska dulman (Cunha, et al, 2006; Sylva, et al, 2004).

Malcamadaha NSW oo ay maalgeliyaan Adeegyada Bulshadu waxay helaan maalgelin dheeraad ah oo la siiyo qoysaska loo aqoonsado inay yihiin Aborjiin ama Torres Strait Islander ama kuwa haysta Kaarka Health Care Card. Maalgelintan dheeraadka ah waxay adeegga u ogolaanaysaa inay yarayso xanibaadaha la xiriira helitaanka malcamadda, ayadoo lala tiigsanayo qoysaskaas.

(Waxaa laga soo qaatay: Policy Brief No 10 2008: Rethinking School Readiness)